Buugii la magac baxay

Bulshadii Qalcoosaneeyd

Qoraa: Dahir Abdulkadir Dahir

“Cudurka kaa gala fardaha, Hadii laga gubo dameer, Dawada lama gaadhayee”

Abwaan Maxamed Jaamac Kayd

Su'aalooyin aan jawaab lahayan:

- Bulshadayda maxa ka dhigay mid raadinaysa mar walbe xumanta qayrkeed ?

- Bulshadaydii maxa ka dhigay mid dhaleecaysa qofkii alle uu diinta fahamsiyo oo ku tilmaamta Xerrow / Xerrowad iyakoo ay mudnayeen in lugu dabo daydo ?

- Bulshaydaydii maxa ka dhigay mid dhexdooda reer reer iyo qabiil qabiil isku faanta, waxad arkaysa qof aan isagu waxba ahayan oo ku faanaya hormar uu walalkii ama walaashi gaadhay kaliya waa isku reer un ?

- Bulshadaydii maxa ka dhigay mid iyaku dhexdooda is quudhsada oo aad arakayso midkii hormar ba ka

gaadha ba lugu odhanayo shalay aniga magaalada keenay ? oo hadaad keentayna !!!

- Bulshadaydii maxa ka dhigay mid isku awood sheegata oo kooga xooga weyn uu dhacayo kooga liita ?

- Bulshadaydii maxa mar walbe iskugu mudda irbada seexisada oo mar walbe ay iskaga indho tirtaa waaqica dhabta ee haysta ?

- Bulshadaydu waa Bulsho Riyo ku nool ah.

- Bulshadaydii waa Bulsho Qalcoosan isku na haysta mid toosan.

Barasho wacan tani waa Bulshadayda aan ka dhashay.

Hore ayay soomali ugu maahmaahday

“ Run iyo ilko ba waa la cadeeya ”

Waxan nahay Bulsho qaloocsan kuna faanaysa qalooceega / xumanteeda !!!

Bulshadayda ayaad ugu imanaysa Qab-weyni, Qabyaalad, Qorri, Qarxis, Qolo Qoleeyn,…….

Waxad Arkaysa Qaylo-dhaan reereed, lakiin ma arkaysid Qaylo-dhaan aqooneed.

Maxan ka wadda hadalka ?

Way iska fududahay in aad aragto dad qabyaalad ahaan Isku camiraya, isku faanaya lakiin ma arakaysid dad ayna qabyaalad kulmin oo aqoon isku keentay hadii ay ba jirtana waa dhif iyo naadir.

Nasiib Xumo !!!

Hordhac:

“ Waxan nahay Bulsho ku nool Humaagayo been ah, Humaagyadasi oo sababay in aduunka oo dhan aan ka danbeeyno dhinac dhaqaale, siyaasad, waxbarasho, caafimaad,…. Iyo hormarada badan ee la gaadhay lakiin maxa sababay wali lama garanayo ”

Waxan isku dayay intii aqoontayda ah in aan ka baadho kadibna soo bandhigo waxan u kala qaaday ila saddex qodob oo muhiim kuwaasi oo kala ah

01. Xishoodkii Qalooca Galay
02. Qabyaaladii Qabka ina Galisay
03. Laf-dhabartii Xumaatay

01. Xishoodkii Qalooca Galay:

Bulsho weliba waxay leedahay dhaqan u gaar ah oo u baadi sooc iyo astaan ah laguna garto laguna tilmaamsado.

Waa jiraal laga simanyahay dhaqanku waana mid si weyn laysugu tixgeliyo laguna tayeeyo bulshadaasi sooyaalkeeda dhaqan iyo hannaankeeda nololeed.

Xishoodka iyo Sariigashada.

Xishoodka iyo anshaxa suubani wuxuu ahaa kaalibta koowaad ee qofka lagu ogaado qofnimadiisa iyo heerka sariigtiisa taagan tahay.

Xishoodku dhan walba waa saameynayey, Hadalka, wax cunida, dad la dhaqanka, tixgelinta sida loo kala mudanyahay, loo kala waaweyn yahay iyo sida laysku yahay.

Haddaba aan dhawr murtiyood soo qaadano oo ka marag furaya habka bulshadeennu xishoodka ka taagnayd.

1: Nimaan Xishooni waa ximaar
2: Ileyn nimaan xishooneyn dagaal, Xeeli kama hayso
3: Xishoodku waa hu‘ qof aan xishood lahayna waa qof aan hu‘ sidan.
4: Xishoodku naftaadu bilaa, Xaragaduna jidhkaaga.

Marka dhanka kale layska taago, waxaa jira habaar hooyooyinku adeegsadaan, Xayada(Xishoodka) alla kaa qaad. Qofka habaarkani ku dhaco ama aan xishoodka lahayni wuxuu bulshadeenna ka ahaa tuke baalcad.

Xishoodku waa han kuu diidaya inaad ku dhiirato foolxumada, Erayada la hal maala xishoodka waxaa ka mid ah. Xishood, Sariig, Xeebasho, Hamrasho, inkastoo midba duluc gaar ah bixinayo

haddana waa isku dhaw yihiin oo waa qof wax xeerinaya kana dhawrsana inuu ku dhaco weji gabax, Biyuur iyo yaxyax laga yaqyaqsado.

Isku soo wada duuboo, hadda bulshadeenna maanta joogtaa arrinkaas dhanka kale ayey iska taageen mana jiro dhaqankii Xishoodku. Xishoodku waa dareenka kaa hor istaaga wax walba oo magac xumo iyo dhaqanxumo ah, sida beenta, tuugada, Afxumada, falfalxumada, dhawrsooni la‘aanta iyo fudeydka badan oo intan oo dhan keena.

02. Qabyaaladii Qabka ina Galisay:

inta aanan u gudo galin dhibaatada ay leedahay qabyaalad, aan ka hadlo. “Maxay kala yihiin qabiil iyo qabyaalad?”. Qabiilka waa in aad ku abtirsataa awoowayaashaada taasina, way banaantahay oo xittaa diinta Islaamka ina fartay, laakiin qabyaalad waa in qofka qabiilkiisa uu ku tageeraa dulmiga kana hormariyo dadka kale aygoon xaq u lahayn.

Taasina waa xaaraam uu ka digay Suubbanuhu ‘Sallah-laah Calayhi Wa-sallam.

Sababtoo ah diinta Islaamka ma qabto in qof Muslim ah dhibo walaalkiisa kale oo Muslim ah. *Waathil bin al-asqas* ayaa waydiyey **Rasuulka SCW** wuxuu ku yiri “**Rasuulka Allow** waa maxay qabyaalad?” **Rusuulka SCW wuxuu ku yiri “waa in aad beeshaada dulmi ku tageertaa”** Qabyaalada waa cudur mesha ay soo gashana way burburisaa. Bulsho kasto ka fogaato qabyaalada way hormartaa. Qabyaalada waxay leedahay dhibaatooyin badan aan ku soo koobi Karin hal maqaal Insha’Allah waxaan isku dayi donaa in aan ka dhigo maqaalo fara

badan. Sababtoo ah qabyaalad waxay noo gaysatay burbur aad iyo aad u fara badan. Akhristoo dhibaatada ay leedahay qabyaalada waxaa kaaga felan tusaale in manta meesha aan taganahay waxyaabihii ina keenay ay ka mid tahay qabyaalada, walina anan ka toobadkeenin oo an ku taaganahay qabyaalad. Qabyaalada meshay soo gasho waa baabiisaa, taasina waxaa ka arki kartaa qaaradaha isticmaalo say ka dhiktay. Qabyaalada inta badan waxaa isticmaalo qayba ka mid ah **Afrika** iyo **Asiya**, kuwa isticmaala waxay ku jiraan dhibaatooyin fara badan. . Qabyaalad ma ogolo aqoonyahanka am indheer garadka, waxay garab istaaktaa jahliga iyo xumaanta mana ogolo in ay bulshada hormarto. Dhibaatooyinka ay leedahay qabyaalada waxaa ka mid ah.

1. Waa Qaran Dumis: waxaan ula jedaa dal dhisan hadii uu bilaawo in uu isticmaalo qabyaalad waxaa mesha ka baxa cadaalada iyo nidaamka kala dambeentii jirtay, mar hadii ay taasi dhacdo qarankaas wuu burburaa. Soomaaliya waxyaabah burburiye qarankeeda waxaa ka mid ahaa qabyaalada, inkastoo markii uu bilaawanaayey dagaalkii dowlada lagu burburiyey hadafyo kale duwan la lahaa sida isbedeldoon oo kale. Lakiin marke dambe arinta waxa ay isku bedeshay qabyaalad

taasina waxay sababtay in ay waxii gacanta ka baxaan.
Dalka marka uu dhacay burburkiisan arintii waxay ku sii fogaatay qabiilaysi. Taasi waxay sababtay in ay dadka isku layaan qabiil qabiil oo uu midba midka uu ka xoog badanyahay dhulka ku daro. Mesha waxaa lagu wayey qarinkii, xaladana waysii adkaatay oo waxay taktay meel aan laga soo qawan Karin waayo wax walbo way burubureen. Kaliya qaran lama burburin oo dalka xitaa waa la burburiyey. Dhibaatadaas waxaa keenay waa qabyaalada, waxayna noqotay mid dadka madaxa ka sii gasha xitaa hadii la helay dowlad kale.
Soomaaliya ayodoo ay ogtahay waxyaabihii qarankeeda dumiyey in ay ka mid tahay qabyaalad wale kama soo laaban. Xitaa waxaan maqlay oo aan aqriyey inbadan wayadi uu wadanka haystay gumaystaha, inta anan la helin ururo awood badan oo xuriyada dhaliya, in ay jireen dad sameeyey isku dayo fara badan oo aan guulaysan sababtan ay aheed dadkaas looma arki jirin dad waxtar soo wado si loo garab istaago ee qabiil ahaan ayaa loo eegi jiray.

Gumaystaha xitaa wuxuu ka dhigan jiray hub dagaal qabyaalad soomaaliya ka

dhaxayso, asogoo u isticmaalaayo soomaaliya in uu ku kala jar jaro si aysan wada jir wax isga celin, sababtoo ah soomaaliya qabyaalad ayey ku dhaqmi jirtay oo qabiil qabiil u kala go'aneed qaraka badakiisa.

Qofkii soo taago madaxa oo isbedel doon ah wuxuu u diri jiray dadka ayaga xambaarsan fikirkood oo soomaalida ka mid ah si ay u dhahaan ninkaan garab masiinayno waayo qabiil hebel ayaa ka dhashay. Ayagoo aminsan hadii u awood yeesho aduu ka hor imanaa oo gumaysto kaama dhicinaayo. Is aminadaas liidata waxaa sababy qabyaalad ka dhaxaysay ayag. Marka soomaaliya in badan ayey ka guuxaysaa qalbigeeda qabyaalad markuu dhacayna burburkii dowlad dib ayey u isticmaleen qabyaalada.

Waxaa burburiyey qarankeena oo nakala geyey midba meel waa qabyaalad. Qabyaalada waxay sababtay in lakaal taktago qaarkeen xabsi galaan qaarna qaxooti

noqdaan qaar kalana la waayo oo qabyo iyo ruux meelay galeen. Intaas waxaa sii dheer in uu burburay wadan bilicdiisa iyo bulsahada dhaqaalaheeha. Intaas waxaa u sabab ah qarankoo burburay, qarankana qabyaaladaa burburiso oo waliba qaar inaga mid ah wale ay qoryihii qabyaalad ay sii shidayaan.

Waddan hadduu uu burburo qarakiisa wax u haraaba iska yar, waayo midowga umadaas waa qarankeeda. Soomaaliyey qabyaalad aan iska dhaafno oo aan qarankeena dib u soo ceshano si uu wax walbo dib noogo soo laabta. Waxaa hubaa umad haday ku dhaqanto cadaalad in ay wax walbo ha gaagi karaan, xitaa Allihii uuntaa uu u gargaari doona, lakin mar hadaan jirin cadaalad wax kale mab jiri doonan. Qabyaaladna meelay jirta cadaalad ka fok. Qarankeena waa dahab wooyo qoomiyda muslim ah ayaan nahay, dhulkeena waa hoddan ee aan iska ciribtirno qabyaalada.

Qabyaalada waxa ay leedahay dhibaatooyin aad iyo aad ufara badan oo aan halkaan lagu soo koobi karin, waxaan hore u soo xusay mid ka mid ah dhibaatoyinka ay leedahay qabyaalada, hadasa waxaan isku dayi doonaa in aan xuso qaar kale oo ka mid ah dhibaatooyinka ay leedahay qabyaalada, si uu meesha inoogu sii socdo maqaalkeena sisilada ahaa oo aan oga hadlaynay dhibaatooyinka ay leedahay qabyaalad.

2. **Dhanka Aqoonta :** intaan tan u guda galin ugu horeen in aan ka bixiyo sharaxaad kooban ayaan isku dayi donaa, waa maxay aqoon yaasa ah aqoonyahaan. Inta badan waa lagu kala duwanyahay fikir ahaan qexidooda oo waxaa jira fikirada badan oo kala duwan. Waxa lagu qeexay aqoon dhanka Islaamka ayaan wax yar ka soo qaadan doonaa iyo xitaa dhanka dadka aan ahayna Muslimka waxa ay ka dhaheen aqoon.

AQOON waa in qofku u yaqaan xiriirka ka dhaxeeya Eebe wayne iyo asaga, inuu yaqaan sidda uu ula dhaqmi lahaa bulshooyinka kala duwan oo kunool dunida isla markaasna garan kara wajibaadka ka saara nolasha dhan walbo. Sidaas si la mid ah ayey ku qexaan dadyowga aan Muslinka ahayn ayagoo ka reeba

kaliya garashada laga rabo qof in uu garto xirirka Eebo wayn kala dhexeeyo.

AQOONYAHAANKA waa midka kala garan kara xumaanta iyo wanaaga ama kala saari karo qaladka iyo saxa, isla markaasna garan kara xaqiiqda dunida loo keenay. Mar hadii usan garan Karin qofka xaqiiqada dhabta ah ee loo keenay dunidaan kuma tilmaami karno aqoon yahay. Aqoonyahanka waa qof wax walbo anan iska qadanaynin am ogolanaynin, isla goortaasna isticmaalo aqoontiisa si uu u kala saaro wixii xun iyo wixii san.

Waa in uu ahadaa qofka bartay cilmiga noocyadiisa kala duwan, kaliya kan hesta shahaadad lama oran karo waa aqoonyahan. Waxaa jira aqoonyahan aanan muslin ahayn, lakiin garanaayo waxyaabo badan oo u sahlaayo in uu garta wajibadkiisa aduunka ka saaran, lakiin anan garanaynin xirirka Eebo iyo asaga ka dhaxeeyo, qofkaas waa aqoonyahy lakin maaha aqoonyahan dhamaystiran am mid ay diinta islaamka sheektay oo xaqa iyo badil kala garan kara.

Akhristoo qof ku dhaqmaayo qabyaalada maku tilmaami karnaa aqoonyahan am qof leh aqoon jawaabta waa maya sidaan filaayo. Sababtoo ah qabyaalada waa waxa ugu xun oo qofka isticmaalo, astamaheeda ay ka mid tahay cadaalad daro. Aqoonyahayka dhabta ah wuxuu yaqanaa dhibaatada ay leedahay caadlada darida dhanka diinta islaamka ma xitaa dhan kasto oo nolasha ah. Qofkastoo leh aqoon oo anan si fiican u isticmaalaynin kuma tilmaami karno aqoonyahan dhamaystiran.

Soomaaliya waxaa dhacda in ay aad u isticmalaan qabyaalada kooda aqoonta bartay iyo kana an baran ayagoo ah dad muslimiin ah mesha waxaa ka cad in ay ka maqantahay aqoonyahaynka dhabta ah oo ay diinta islaamka sheektaya. Qofka in uu gartaa ALLE sababuhuu u abuuray ayaa ugu filan aqoon taasi aya ka fogayn karta xumaanta ay leedahay qabyaalada. Qof walba oo isticmaalo qabyaalad malaha aqoon mana lagu tilmaami karo aqoonyahay sababtoo ah aqoonta waxay qofka ka fogay xumaanta.

Soomalida waxaa ku yar aqoonta waan sababtay ay u isticmalaan qabyaalada oo ilaa iyo hada ay u garan layihiin dhibaatada ay leedhay qabyaalada kooda bartay aqoonta xitaa laguma tilmaami karo aqoonyahay sababtoo ah uma

isticmaalin wadad loogu tala galay aqoonta. Dhibatada qabyaalada way soconee ilaa aqoonta wadada saxan loo isticmaalo. Waan asbaabta lagu dhihi karo xitaa aqoonta soomaaliy qabyaalada samay ayey ku yeelatay wayo kii bartay aqoonta xitaa iskama joogin isticmaalka qabyaalada.
Aqoonta waa waxyaabaha kala duwan ee la bartay, lakiin waxbarasha waa qeeb ka mid ah aqoonta bal aan wax ka dhaha dhibaatada ay waxbarashada u gaysatay qabyaalada.

3. **Dhanka Waxbarashada:** waxaa dhacda in badan in dadka la kala hormariyo dhanka waxbarshad qabyaalad owgeeda. Taasi waxaan ula jedaa waxaa laga yabaa in uu qof cilmi leh fursad waxbarsho oo dibada ah ama dalka ah helo oo ah fursad lacag la'aan, una qalmo in uu ka fa'idaysto qofka cilmiga leh oo dalka iyo dadka wax ku soo kordhin karo. Waxaasa dhacdo qabyaalad owgeeda in fursadaas la siiyo qof anan u qalmin oo aan cilmi lahayn meshan ay ka baxdo fa'idadii fursadaas loogu tala galay.

Waxaa dhacda mararka qaar in lagu diro fursad waxbarasho oo dibad ah qof u socdo tahriib sababtan ay tahay qabyaalad awgeeda. Waxaa

taas kasii daran qofkii baxa meesha naftiisu ayuu ku wayaa, kii waa dhintay ku kalena waxbarasho ma aadin qasaaradaas qabyaaladaa ayaa u sabab ah. Xitaa waxaa dhacda in qof uu lahaa kaalmaha ugu sareeya dhanka waxbarshada sameyey dadaal fara badn lag galiyo kalintiisa mid aan si fiican wax ubaran aayadoo loo egaayo qabiilkiisa, meesha waxaa ku qalbi jawa kii sameyey dadaalka faraha badan. Am xitaa waxaa dhacdo qof cabsi lagaqabo qabiilkiisa owgeeda in asgoo dhacay imtixaanka la baasiyo.

Marka dhanka waxbarsha waxaa jira dhibaatooyin fara badan oo ay qabyaalada sababtay oo aan halkaan lagu soo koobi karin. Wadanka mudo ayuu burbursanyahay, burburkaasna qabyaad ayaa ka qeeb qaadatay kaliya dhibaato uma sababin waxbarasha ee dhan kasto ayey dhibaato u sababtay. Allow cudurkaan qabyaalada inaga caafi, oo natus soomaaliya oo midowday.

03. Laf-dhabartii Xumaatay:

1: **Tayada waxa barashada :** waxa tasi keenta isbadelka ka dhashay hoosa u dhaca ku yimaday bulashada waan mida lugu kala tagay oo laysa ku dhafaya .

2: **Diin la'anta :** waa mid ka mida aha samayta ugu weeyn ee bulusha ka ksata oo ku dhaqan tan dasatuur [Constitution],

ka oo aan wafaqasaneeyn diinta islaamka ama laga hore marriyay isaga waa dhibaatadiisa u wata bulashada soomaaliyed.

3: **Cadaalad iyo sinaana oo loyaqano** (justice and equal).

Tan waa halka ay ku kala hadhan bulashada aduunka waana waxa badan ee keen hoos u dhaca ku iyada bulashada, waan dhibto kale oo sabab u ah qalooca bulshada hadii la waayo labada shaya oo aha cadaalad iyo sinnaanta waxa ka baxay booska ugu weeyn ee bulushada ku ladahay wadankan oo ah midnaanta.

4: **Maal mul xumada :** maamul xumado waa mid ka mid aha bur burka bulashada waa hal ugu muhiisan ee loga baa hayan inay bulasha kasat ay ka dhaqado waa sabab keenta inay bulusha kasata oo aan lahayan hogaamiye (leder), ay burburto waxa

Gabo Gabo:

Dhibaatadan na hayasta waa mid aan anaku isku sababnay Xalkeedana aan aqoon u leenahay lakiin mid walbe uu is leeyahay Adiga maxa ka galay cidii ku baaba'yso ? !!!
Ogsoonow Daadku inta uu ku soo galin ayaa layska moosa, cida isbadal sameeyn karta waa adiga akhriste waayo hadaad adigu fikirkaaga hagaajiso waxad hagaajin karta bari ka maalin fikir qaloocsana oo u bahaan toosin, lakiin hadii aad tirahado aniga shaqadayda maha hadaba waa suaalee yay shaqadiisa noqon doonta !!!

Kaliya waxayad ahayad fikir gudahayga ka dhex guuxayay oo aan jeclaystay adiga akhriste in aan ku soo bandhigo wad qaadan karta wanad iska deyn karta.